**WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA**

WASAARADDA QORSHEYNTA QARANKA

# WARSIDAHA BISHA MAARSO 2026



## HORDHAC

**Bishii Maarso 2026** waxay ahayd mid si gaar ah muhiim ugu ahayd dadaallada Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo la xoojiyay doorka hoggaaminta qorsheynta qaranka, isku-duwidda hay'adaha, iyo dardargelinta mashaariicda horumarineed. Inta lagu guda jiray muddadan, Wasaaraddu waxay qaaday tallaabooyin istiraatiiji ah oo lagu xoojinayo iskaashiga gudaha iyo kan caalamiga ah, kor loogu qaadayo nidaamyada kormeerka iyo qiimaynta, isla markaana lagu hubinayo in dhammaan dadaallada horumarineed ay si buuxda ula jaanqaadaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (**NTP 2025–2029**).

Waxqabadyadan ayaa muujinaya jihada cad ee dowladda ee ku wajahan dhismaha hay'ado hufan, kor u qaadista maalgashiga, iyo xaqiijinta horumar waara oo saameyn toos ah ku leh nolosha shacabka Soomaaliyeed.Wasiirka Qorsheynta oo Guddoomiyay Shir Lagu Xoojinayo Isku-dubaridka Hay'adaha Dowladda iyo Dardargelinta Mashaariicda Sanduuqa Wadajirka ee Soomaaliya

## Wasiirka Qorsheynta Qaranka oo Shirgudoomiyay kulan laguxoojinayay isku-dubaridka iyo wada-shaqeynta hay'adaha dowladda



**31-ka Maarso 2026 –** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa guddoomiyay shir looga hadlayay xoojinta isku-dubaridka iyo wada-shaqeynta hay'adaha dowladda, gaar ahaan Wasaaradaha Qorsheynta, Arrimaha Gudaha iyo Howlaha Guud.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray dardargelinta mashaariicda hoos yimaada Sanduuqa Wadajirka ee Soomaaliya (Somalia Joint Fund), oo ay si wadajir ah u maamulaan Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Qaramada Midoobey. Intii uu shirku socday, waxaa si gaar ah looga dooday mashruuca Saameynta wejigiisa labaad (Saameynta 2.0), kaas oo la filayo inuu dhawaan si rasmi ah u bilowdo.

Shirka waxaa ka qeybgalay Wasiirka Howlaha Guud, Guriyeynta iyo Dib-u-dhiska, Mudane Ayuub Ismaaciil; Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamed Shire; Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Mudane Cabdulqaadir Cilmi; Agaasimaha Guud ee Xarunta Qaran ee Horumarinta Reer Miyiga iyo Xalka Waara, Marwo Zahra Cabdi, iyo sidoo kale agaasimayaal waaxeedyo iyo lataliyayaal farsamo.

Kulanka ayaa ka dhacay xarunta Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, waxaana uu qeyb ka yahay dadaallada dowladda ee lagu xoojinayo wada-shaqeynta hay'adaha, sare u qaadista isku-xirnaanta qorsheynta, iyo dedejinta hirgelinta mashaariicda mudnaanta u leh horumarka dalka.

## Heshiiska Is-afgarad ee Hormuud iyo GIZ ee Soomaaliya




**31-ka Maars0 2026 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa ka qeybgalay munaasabadda saxiixa heshiis is-afgarad (MoU) oo dhexmaray Shirkadda Hormuud iyo Hay'adda GIZ ee Jarmalka, kaas oo lagu horumarinayo dhaqaalaha dijitaalka ee Soomaaliya.

Heshiiskan wuxuu xoojinayaa iskaashiga dowladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, isagoo taageeraya hal-abuurka, kobcinta xirfadaha dhalinyarada, iyo abuurista fursado shaqo.

Heshiiska ayaa si buuxda ula jaanqaadaya Qorshaha Isbeddelka Qaranka (#NTP2025_2029), kaas oo mudnaanta siinaya koboc dhaqaale oo ay hormuud ka yihiin ganacsiga gaarka loo leeyahay, isla markaana kor u qaadaya fursadaha shaqo iyo horumarinta adeegyada dijitaalka.

Waxa kale oo uu xoojinayaa kaalinta Soomaaliya ee isdhexgalka Bulshada Bariga Afrika (EAC), isagoo fure u noqonaya kobcinta ganacsiga, isku xirnaanta suuqyada, iyo horumar wadajir ah oo gobolka ah.

## Kulan-howleedka Ansixinta Warbixinta Qiimeynta Baahiyaha Karaanka SOMINVEST si loo Xoojiyo Nidaamka Dhiirrigelinta Maalgashiga Soomaaliya



**30-ka Maarso 2026 -** Xafiiska Dhiirigelinta Maalgashiga (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa qabatay kulan heer sare ah oo lagu ansixinayo Warbixinta Qiimeynta Baahiyaha Karaanka SOMINVEST (Capacity Needs Assessment-CNA), taas oo ah tallaabo muhiim, laguna xoojinayo nidaamka dhiirrigelinta iyo fududeynta maalgashiga dalka.

Kulankan oo labo (2) maalin soconayo ayaa waxaa ka qeyb galaya hoggaanka sare ee wasaaradda, khubaro farsamo, iyo howl-wadeennada SOMINVEST, si loo falanqeeyo natiijooyinka warbixinta islamarkaana la isla meel dhigo isbeddellada hay'adeed ee mudnaanta leh, na waafaqsan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Mohamed Shire, ayaa sheegay in xoojinta SOMINVEST ay laf-dhabar u tahay kobaca dhaqaalaha iyo soo jiidashada maalgashi calami ah oo tayo leh.

Warbixintu waxay caddeyneysaa in SOMINVEST leedahay aas-aas wanaagsan sida himilo cad, qaybaha dhaqaale ee mudnaanta leh, iyo howl-wadeenno u carbisan howlaha maalgashiga. Hase yeeshee, waxaa jira caqabado la xiriira: nidaamyada dijitaalka ee maareynta maalgashatada, isku-duwidda hay'adaha dowladda heerarkooda kala duwan, awoodda cilmi-baarista iyo talo-bixinta siyaasadeed, iyo adeegyada taageerista maalgashatada haatan jirta.

Kulanka ayaa lagu ansixiyay tallaabooyin muhiim ah oo la fulin doono inta u dhexeysa 2026–2027, oo ay ka mid yihiin: hirgelinta nidaamka hal-goob (one-stop shop), sameynta nidaam dijitaal ah (Investors Management System-IRM), dhisidda Xarunta Xiriirka Maalgashatada (Call Center), xoojinta cilmi-baarista iyo daraasaadka, iyo barnaamij tababar oo nidaamsan.




Warbixintu sidoo kale waxa ay tilmaamaysaa in fursado cusub ay ka jiraan dalka kadib horumarada dhaqaale ee dhowaan la gaaray, taas oo kor u qaadaysa kalsoonida maalgashatada caalamka.

Kulanka ayaa ku soo gabagaboobay fahan guud oo ku saabsan mudnaanta fulinta iyo ballanqaad lagu xoojinayo SOMINVEST si ay u noqoto hay'ad qaran oo hufan, soona jiidan karta maalgashi lixaadle.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Qabatay Shirka Wada-tashiga Qaran ee Kormeerka SDGs



**29-ka Maarso 2026 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa qabatay Shirka Wada-tashiga Qaran ee kormeerka Himilooyinka Horumarka Waara (SDGs), iyadoo diiradda la saarayo xoojinta nidaamyada qaranka iyo waafajinta iskaashiga horumarineed si loo dardargeliyo hirgelinta ajendaha qaran, oo uu ku jiro Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Shirkan ayaa si gaar ah loogu falanqeeyay tilmaamayaasha SDG 17.15.1 iyo 5.c.1 ee Wareegga 4-aad ee Kormeerka Iskaashiga Horumarineed (GPEDC), kuwaas oo cabbira heerka ay deeqaha horumarineed ula jaanqaadaan mudnaanta qaranka iyo sida loo xoojiyo nidaamyada dowladeed ee hoggaaminta horumarka. Kulanka waxaa ka soo qeybgalay hay'adaha dowladda, Qaramada Midoobay, deeq-bixiyeyaasha, ganacsiga gaarka loo leeyahay, rugta ganacsiga iyo bulshada rayidka ah, si loo xoojiyo isku-duwidda iyo is-waafajinta dadaallada horumarineed.

Ujeeddadu waxay ahayd dib-u-eegista natiijooyinka kormeerka, qiimeynta horumarka la gaaray, iyo aqoonsiga caqabadaha jira, iyadoo la isla gartay tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu horumarinayo wax ku oolnimada iskaashiga horumarineed ee dalka.

Agaasimaha Kormeerka iyo Qiimeynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa soo bandhigay geeddi-socodka kormeerka iyo doorka uu ku leeyahay xoojinta nidaamyada qaranka, isla xisaabtanka, iyo isticmaalka xogta ku saleysan go'aan qaadashada.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, oo soo xiray shirka, ayaa xusay in kulankani yahay mid istiraatiiji ah oo ka gudbaya dib-u-eegis, una gogol xaaraya go'aanno wax ku ool ah. Wuxuu tilmaamay horumarka laga gaaray qorsheynta loo dhan yahay iyo kororka kalsoonida lagu qabo nidaamyada qaranka, isagoo sidoo kale muujiyay caqabadaha jira sida ka qaybgalka xaddidan ee daneeyeyaasha, tayada xogta, iyo isku-duwidda hay'adaha.




Wuxuu ku baaqay tallaabooyin mudnaan leh oo lagu xoojinayo ka qaybgalka daneeyeyaasha, horumarinta nidaamyada xogta qaranka, iyo adkaynta isla xisaabtanka, si loo hubiyo in iskaashiga horumarineed uu si buuxda ula jaanqaado mudnaanta qaranka.

Shirku wuxuu ku soo dhammaaday is-afgarad cad oo ku aaddan qaadista tallaabooyin la taaban karo, si loo xoojiyo waxtarka iskaashiga horumarineed loona dardargeliyo gaarista natiijooyin waara oo la jaanqaadaya Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP).

## Wasiirka Qorsheynta iyo Wakiilka UNICEF oo ka wada hadlay xoojinta iskaashiga iyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka



**29-ka Maarso 2026 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee XFS, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan miro-dhal ah la yeeshay wakiilka UNICEF ee Soomaaliya, Sandra Lattouf.

Qodobbada ugu muhiimsan ee kulanka waxaa ka mid ahaa: Iswaafajinta hirgelinta Barnaamijka Waddanka ee UNICEF (CPD 2026–2030) iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyadoo diiradda la saarayo qorshaynta, kormeerka iyo qiimaynta (M&E), iyo isku-duwidda hay'adaha; Ballaarinta jawaabaha lagu wajahayo dhibaatooyinka cuntada iyo nafaqo-xumada, si gaar ahna diiradda loogu saaro haweenka iyo carruurta Soomaaliyeed; Horumarinta awoodda hay'adaha dowladda, tayeynta nidaamyada isku-duwidda, iyo kobcinta kheyraadka aadanaha; Dardargelinta u doodista wadajirka ah iyo abaabulka kheyraadka si loo sii wado mashaariicda horumarineed, iyadoo ay jirto hoos u dhac ku yimid taageerada caalamiga ah.

Wada-shaqayntani waxay laf-dhabar u tahay hirgelinta dadaallo wax-ku-ool ah oo horseeda isbeddel waara oo ka hanaqaada dalka.



## SOMINVEST oo Xoojisay Dowrka Soomaaliya ee Maalgashiga Afrika, Kana Qayb Gashay Madasha COMESA




**28-ka Maarso 2026 -** Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgashiga Soomaaliya (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa ka qayb qaatay Shirka Sanadlaha ee Hay'adaha Dhiirrigelinta Maalgashiga ee dalalka COMESA, oo ka dhacay magaalada Nairobi, Kenya.

Shirkan heerkiisu sarreeyo ayaa waxaa isugu yimid hay'adaha dhiirrigeliya maalgashiga, dejiyeyaasha siyaasadaha, iyo daneeyayaal kale oo muhiim ah si loo xoojiyo iskaashi goboleed loona horumariyo istiraatiijiyadaha lagu ballaarinayo soo jiidashada maalgashiga ee gobolka.

Wafdiga Soomaaliya waxaa hoggaaminayay Agaasimaha SOMINVEST, Mudane Maxamed Dubo, oo la kulmay dhiggiisa ka socday 17 hay'adood oo xubno ka ah COMESA, iyagoo ka wada hadlay hababka ugu wanaagsan ee lagu kobcin karo maalgashiga iyo muhiimadda ay leedahay isku-duwidda dadaallada heer gobol.

Doodaha shirka ayaa si gaar ah diiradda u saaray warbixinta Maalgashiga COMESA 2025, habraacyada diyaarinta warbixinta 2026, iyo is-weydaarsiga khibradaha ku saabsan dhiirrigelinta maalgashiga. Waxaa si cad loo muujiyey in iskaashiga goboleed uu yahay arrin istiraatiiji ah oo lama huraan u ah kobaca dhaqaalaha iyo horumar waara.

Iyadoo laga faa'iideysanayo aragtiyo iyo xog kasoo baxday Shirka Qaramada Midoobay ee Ganacsiga iyo Horumarinta (UNCTAD), SOMINVEST waxay sii xoojinaysaa dadaalladeeda ku aaddan horumarinta istiraatiijiyadaha maalgashi ee dalka, si Soomaaliya looga dhigo meel tartan leh oo soo jiidata maalgashiga caalamiga ah.

Ka qaybgalka SOMINVEST ee shirka COMESA wuxuu muujinayaa sida ay Soomaaliya uga go'an tahay xoojinta iskaashiga goboleed, kobcinta maalgashiga, iyo horumarinta dhaqaalaha dalka, iyadoo la waafajinayo mudnaanta Qaranka ee ku cad Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

## Soomaaliya oo Ka qeybgashay Madasha Maalgashiga COMESA ee Nairobi



**26-ka Maarso 2026 -** Xafiiska Dhiirigelinta Maalgashiga Soomaaliya (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa ka qeybgalaysa Madasha Maalgashiga COMESA ee ka socota magaalada Nairobi, iyadoo wafdiga Soomaaliya uu hoggaaminayo Agaasime Maxamed Dubo.

Madashan waxaa isugu yimid hay'adaha dhiirrigeliya maalgashiga, dejiyeyaasha siyaasadaha, hay'adaha horumarinta, iyo maalgashadeyaal caalami ah oo ka kala socda dalalka xubnaha ka ah COMESA, si loo xoojiyo iskaashiga gobolka loona kobciyo maalgashiga horseedaya horumar dhaqaale oo waara.

Ka qeybgalka SOMINVEST wuxuu muujinayaa sida ay Soomaaliya uga go'an tahay soo jiidashada maalgashi istiraatiiji ah, dhisidda iskaashi waxtar leh, iyo in dalka loo asteeyo goob soo jiidata maalgashiga caalamiga ah.

Inta uu socdo shirka, wafdiga Soomaaliya wuxuu kulammo la yeelanayaa daneeyayaal kala duwan si loo soo bandhigo fursadaha maalgashi ee dalka, loo muujiyo khayraadka dihan iyo suuqyada aan weli si buuxda looga faa'iideysan, isla markaana loo dhiso iskaashi horseeda koboc dhaqaale oo waara.

## Wasaaradda Qorsheynta iyo FAO oo Xoojiyay Iskaashiga ku aaddan Adkeysiga iyo Sugnaanta Cuntada



**12-ka Maarso 2026 Muqdisho, Soomaaliya —** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Shire, ayaa xarunta Wasaaradda kula kulmay wafdi ka socday Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO).

Wafdiga FAO waxaa hoggaaminayay Mudane Ezana G. Kassa, oo ah Madaxa Barnaamijyada FAO Soomaaliya, waxaana ka mid ahaa Marwo Verenica Mutiro, Ku-xigeenka Madaxa Barnaamijyada, iyo Mudane Aneel Memon, Madaxa Barnaamijka Lacagta Degdegga ah ee FAO Soomaaliya.

Kulanka waxaa sidoo kale ka qeyb galay masuuliyiin sare oo ka tirsan Wasaaradda, oo ay ka mid yihiin Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta Mudane Maxamuud Siciid Nuur, Ku-simaha Agaasimaha Waaxda Qorsheynta isla markaana Madaxa Qeybta Adkeysiga Marwo Warda Salad Yuusuf, iyo Mudane Cabdullaahi Cabdi Nuur (Duqow), Madaxa Mashaariicda iyo Barnaamijyada.

Intii uu kulanku socday waxaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga u dhexeeya Wasaaradda iyo FAO, gaar ahaan dhinacyada kormeerka iyo qiimaynta mashaariicda, barnaamijyada adkeysiga bulshada, iyo isku-duwidda dadaallada sugnaanta cuntada.

Sidoo kale waxaa laga wada hadlay horumarka laga sameeyay Qaab-dhismeedka Barnaamijka Dalka ee FAO, iyo mashaariicda hadda socda iyo kuwa qorshaha ku jira ee taageeraya horumarinta qeybaha waxsoosaarka dalka, sugnaanta cuntada, iyo kor u qaadista nolol-maalmeedka bulshada.



Kulankan ayaa qeyb ka ah dadaallada Wasaaradda ee lagu xoojinayo iskaashiga ay la leedahay hay'adaha caalamiga ah si barnaamijyada horumarineed ay ula jaanqaadaan mudnaanta horumarineed ee dalka.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Xoojisay Iskaashiga Hay'adaha Caalamiga ah si loo Dardargeliyo Hirgelinta NTP 2025–2029



**5-ta iyo 9-ka Maarso 2026 –** Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta (K&Q) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay kulamo istiraatiiji ah oo ay la yeelatay hay'adaha caalamiga ah ee COOPI, Action Against Hunger (ACF), iyo SOS Soomaaliya.

Kulamadan ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga dowladda iyo hay'adaha horumarinta, kor u qaadista nidaamyada Kormeerka iyo Qiimaynta (M&E), hagaajinta wadaagga xogta, iyo hubinta in mashaariicda ay hay'adahani ka fuliyaan dalka ay si buuxda ula jaanqaadaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Kulamada waxaa shir-guddoomiyay Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, halka kulanka SOS Soomaaliya uu hoggaaminayay Agaasimaha hay'adda, Mudane Cabdulqaadir Dhaqane.

Intii ay socdeen kulamada, waxaa si gaar ah loo falanqeeyay mashaariicda ay hay'aduhu ka fuliyaan Soomaaliya, iyadoo la adkeeyay muhiimadda ay leedahay isku-duwidda hay'adaha dowladda iyo la-hawlgalayaasha horumarineed, si loo xaqiijiyo natiijooyin wax ku ool ah oo la jaanqaadaya mudnaanta qaranka.

Wasaaradda ayaa mar kale carrabka ku adkeysay in hirgelinta guuleysata ee NTP ay ku xirnaan doonto wada-shaqeyn dhow, nidaamyo kormeer iyo qiimayn oo hufan, iyo adeegsiga xog lagu kalsoonaan karo si loo hago go'aan qaadashada iyo qorsheynta horumarineed.

## Wasaaradda Qorshaynta iyo Qaramada Midoobay oo Ka Wada Hadlay Dardargelinta Mashaariicda Horumarinta iyo Sanduuqa Wadajirka ah ee Soomaaliya (SJF)



**3-da Maarso 2026 –** Wasiirka Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa xafiiskiisa kulan muhiim ah kula yeeshay Ku-xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, ahna Iskuduwaha Arrimaha Bini'aadantinimada ee Soomaaliya, Mudane George Conway.

Kulankan oo ka dhacay xarunta Wasaaradda, ayaa diiradda lagu saaray dhammaystirka hannaanka Iskaashiga ee Qaramada Midoobay (UNCF), oo lafdhabar u ah isku-duwidda taageerada horumarineed ee caalamiga ah iyo qorshayaasha qaranka, si loo hubiyo in mashaariicda Qaramada Midoobay ay si toos ah ula falgalaan adeegaan baahiyaha mudnaanta u leh shacabka Soomaaliyeed.

Sidoo kale, labada mas'uul ayaa si qoto dheer uga wada hadlay sidii xal loogu heli lahaa caqabadaha hortaagan habsami-u-socodka howlaha Sanduuqa Wadajirka ah ee Soomaaliya (Somalia Joint Fund - SJF). Wasiir Beenebeene ayaa hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay in la fududeeyo hab-raacyada shaqo, si loogu guuleysto in dhaqaalaha loogu talagalay horumarinta uu gaaro goobaha loogu talagalay wakhtiga ugu habboon.

"Iskaashiga naga dhexeeya Qaramada Midoobay waa mid horseed u ah jihada kor u kaca dhaqaalaha dalkeenna," ayuu yiri Wasiir Beenebeene. "Hagaajinta hab-raacyada shaqo iyo xallinta caqabadaha jira waxay noo saamaxaysaa inaan hubinno in maalgelin kasta oo dalka lagu sameeyo ay dhaliso natiijo muuqata oo wax ka beddesha nolosha muwaadiniinta."

Wasaaradda Qorshaynta waxay markasta u taagan tahay xoojinta iskaashiga caalamiga ah ee ku dhisan hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo gaarista yoolalka horumarineed ee fog, si loo xaqiijiyo xasilooni dhaqaale oo waarta.